

Waxaa laga fekerayaa in shahaado koroone lagu soo rogo qabanqaabooyinka iyo goobaha cuntada iyo cabbitaanka

Waxay dawladdu Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha fartay in ay qiimeeyaan soo-jeedinno xeer-hoosaad oo la xiriira sida shahaadada koroonaaha loogu adeegsan karo qabanqaabooyinka iyo goobaha cuntada iyo cabbitaanka.

– Dawladdu waa ay soo dhawaynaysaa in la kala duwo dadka tallaalan iyo kuwa aan tallaalnayn, waxayna taas qiimayn doontaa marka ay suuragasho in tillaabooyinka la sii fududeeyo. Wakhtigan xaadirka ah dadka aan tallaalnayn lagu soo rogi maayo tillaabooyin ka-hortag cudur oo xeer-hoosaad ku soo baxay oo ka adag kuwa dadka tallaalan, ayay tiri Kjerkol.

– Tillaabooyinka oo la kala duwo waxay culayska tillaabooyinka ka yarayn karaan qaybaha badan ee dadka ee tallaalan. Taas oo ay keenayso dadka aan tallaalnayn in aan la beegsan karno tillaabooyin looga difaacayo in ay cudurka aad ugu xanuunsadaan, oo aan islama ahaantaana yarayno halista loogu jiro in culays xad-dhaaf ah la saaro awoodda laamaha caafimaadka- iyo daryeelka, ayay tiri Kjerkol.

Talooyin u gaar ah dadka aan tallaalnayn

Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira talooyin u gaar ah dadka 18 sano ka weyn ee aan tallaalnayn maaddaama ay khatar badan ugu jiraan in ay aad ugu xanuunsadaan haddii uu cudurku ku dhoco. Dadka aan tallaalnayn, waa in ay is ilaaliyaan ama iska daayaan meelaha ay dadka badani isugu yimaadaan ama meelaha cuntada iyo cabbitaanka lagu bixiyo ee ay caadiyan adag tahay in la kala fogaado. Sidoo kale looma baahna in ay u baxaan safarrada aan lagama maarmaanka ahayn ee lagu tegayo meelaha cudurku ku badan yahay.

Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu hadda ma soo jeedinayaan tillaabooyin ka-hortag cudur oo cusub oo xeer-hoosaad ku soo baxay kuna socda dadka aan tallaalnayn iyo qodobbada adeegsiga shahaadada koroonaha midna. Waxay qabaan in haddii dadka aan tallaalnayn lagu soo rogo tillaabooyin ka-hortag cudur oo ka adag kuwa dadka tallaalan in ay taasi waxtar yar ku yeelanayso is-qaadsiinta cudurka. Taas oo ay keentay in ay dadka aan tallaalayn qayb yar ka yihiin dadweynaha guud, iyo in dadka tallaalan laftigoodu ay cudurka gudbin karaan.

Marka waddanka la soo gelayo tillaabooyin kala duwan ayaa ka yaalla dadka caddayn kara in ay tallaalan yihiin ayaga oo soo bandhigaya shahaado koroone iyo kuwa aan caddayn karin.

Kala duwidda tillaabooyinku waxay yeelan kartaa ujeeddooyin badan

Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxay sheegayaan in kala duwidda tillaabooyinku ay yeelan karto laba ujeedo oo kale oo aan ahayn ka hortagga is-qaadsiinta cudurka: Marka koowaad waa in dadka aan tallaalnayn laga difaaco in ay cudurka aad ugu xanuunsadaan, in la daahiyo is-qaadsiinta dhexdooda ah oo halkaas lagu xaddido culayska guud ee saaran adeegga caafimaadka iyo baahida loo qabo in dadweynaha tillaabooyin lagu soo rogo. Marka labaad waa si loo kordhiyo tirada dadka tallaalan. Maaddaama ay Norway markii horeba aad u badnaayeen dadka tallaalan, ayaysan Agaasinka Caafimaadka iyo FHI u malaynayn in uu dalabka tallaalku keeni doono in ay aad u korodho tirada dadka tallaalan.

Ka hor inta aan dawladdu go'aamin ballaarinta isticmaalka, waxaa loo baahan yahay in waxyaalo la kala caddeeyo oo la qiimeeyo. Waxyaalahaas waxa ka mid ah in uu hadda jiro nooc fayras ah oo cusub oo leh astaamo ka duwan kuwii noocii delta. Waa in la kala caddeeyaa waxyaalaha ay ka midka yihiin cidda loo arkayo in ay tallaalan tahay iyo micnaha ay tijaabadu samaynayso.